


Tababar ku saabsan Xalalka waara oo loogu talagay Bulshooyinka uu Barakacu Saameyey ee Somalia

Koorsada 2aad. Kulanka 4aad: ka qaybgelinta Bulshooyinka uu saameyey barakaca iyadoo loo marayo qorsheynta ku saleysan Bulshada

Faalo Kooban

Ficillada ku saleysan dadka iyo qorshayntu waa mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee habka aagga ku saleysan. Waxay u baahan tahay ka-qaybgalka Bulshooyinka uu saameyey Barakaca oo macno leh oo hufan ee dhamaan mudada lagu jiro wareegga qorshaynta, laga bilaabo qorshaynta ilaa kormeerka iyo qiimaynta. Waxaa lagu sameyn karaa iyadoo loo marayo qaadashada hanaan ku saleysan bulshada kaasoo ay bulshadu door firfircoon ku leeyihiin kana qeybqaataan muujinta iyo wax ka qabashada arrimaha iyaga quseeya. Kulankaan waxaan isku dayi doonaa oo aan soo jeedin doonaa si talaabo talaabo ah hab loo wada dhan yahay oo lagu horumarinayo qorshe hawleed bulsheed ku salaysan aaga oo ay hogaamiso dowlada anagoo hubineyna kaqeybgal wax ku oolka ah ee bulshooyiinka uu saameyey barakaca. Hanaankan wuxuu ku saleysan yahay midka loo sameeyay mashruuca Midnimo ee Soomaaliya kaasoo waafaqsan hannaanka dhisida is-afgaradka ee dhismaha Wadajir ee ay adeegsadaan maamullada maxalliga ah. Waxaan sidoo kale baari doonnaa qaabab aan ku xoojino kuna xirno qorshahan qorshaynta horumarinta maxaliga si loo xaqiijiyo hirgelintiisa iyadoo loo marayo kaqeybgalinta ururada hawl wadeenada oo badan ee qaybaha oo dhan.

Ujeedooyiinka

Dhamaadka kal-fadhiga ka-qaybgalayaashu waxay awoodi doonaan inay:

- Adeegsadaan hab ku saleysan bulshada iyo habka ka qaybqaadashada.
- Sharaxaan waxa ay tahay Qorshaynta ku saleysan Bulshada.
- Sharaxaan geeddi-socodka qorshe hawleedka bulshada illaa ku daristiisa qorshaynta maxalliga ah ama heer qaran.
- Baaraan mashaariicda qorshaynta bulshada ku saleysan ee laga fuliyay Soomaaliya iyo saameynta ay ku leeyihiin bulshooyinka uu saameyey barakaca.

Fariimaha Muhimka ah

1. La xisaabtanka ay sameynayaan dadka ay dhibaatadu saameysay ayaan ka badneyn hubinta in dadku ay udub dhexaad u yihiin habka deegaanka ku saleysan iyo in mas'uuliyada isla-xisaabtanka saaran ururada iskaashiga aynan wajihin deeq bixiyaasha oo kaliya laakiin ugu horeyn dadka ay la shaqeynayaan wajahdo
2. Habka ku saleysan bulshada waa qaab ay beeluhu door firfircoon ku leeyihiin kana qeybgalaan muujinta iyo wax ka qabashada arrimaha iyaga quseeya.
3. Habka ku saleysan bulshada wuxuu ka kooban yahay awood siinta ururada maxalliga ah si ay u go'aamiyaan nooca waxqabadyada ugu waxtarka badan iyo taageerada hirgelintooda iyo qiimeynta waxqabadyada. Si tan loo gaaro, waxqabadyada ku saleysan bulshada waa inay sidoo kale xoojiyaan isuduwidda maxalliga ah iyo awoodda qorshaynta.
4. Marka laga hadlayo hawsha geedi-socodka Qorshaynta hawlaha Bulshada, bulshooyinka uu saameyey barakaca ayaa ah ilaha aasaasiga ah halkii ay ka ahaan lahaayeen waxyaabaha qorshaynta xalka. Habkani wuxuu ku dhiirrigelinayaa inay si firfircoon uga qayb qaataan qorshaynta, hirgelinta iyo kormeerka howlaha xallinta.
5. Samaynta Qorshe Hawleed Bulsho oo loo wada dhan yahay oo isku dhafan waxay u baahan tahay geedi-socod tallaabo tallaabo ah oo soo saarto qorshe isku dhafan oo lala xiriirinayo qorshayaasha horumarinta maxalliga ah, qaybaha iyo ajendhaha qorsheynta.
6. Waa in tiro koob iyo diiwaan gelin dhammaystiran lagu sameeyaa dhamaan qaybaha sida kooxaha hongaanka bulshada bilowga waxqabadyada sidoo kale waxqabadyadu waa inay xoojiyaan kooxaha iyo qorshooyinka jira eek a horeeyey. Waa in loo aaburin kooxo cusub hadii aynan soo ku soo kordhinayn qiimo/qayim la taaban geedi socodka qorshaynta bulshada waana muhiim in laga feejignaado wax metelaad la'aan ah si wax looga qabto arrimahaas.
7. Geedi socodka qorshaynta qorshe hawleedka bulsho waa in ay hogaamiyaan iskuna duwaan maamulada deegaanka si loo hubiyo in ay jirto waafaqsanaan ku saabsan qorshooyinka deegaanka maxaliga gaar u leeyahay ee deegaanka ku saleysan ee jira. Maqnaanshaha arrimahan, barnaamijyada ku saleysan aagga waa inay gacan ka geystaan / taageeraan horumarkooda/abuurkooda

Ogsoonow in qoraallada fududeynta iyo talooyinka iyo sidoo kale farriimaha muhiimka ah ay ku jiraan bog kasta oo ku jira sanduuqa qoraalka.

Habka Gudbinta

Qaabdhiska casharka

Jimicsi awood-bixiye gaaban oo lagu bilawayo

Fududeyn sawiro sidata: weydii 5 kooxood inay keenaan hab wanaagsan oo ay ku sawiraan /u soo helaan muuqaalka ereyada soo socda, koox kasta waxaa loo qoondeeyey hal eray:
- Ogeysii/wargelin
- La tasho
- Awoodsii
- Ka qaybgeli
- Wada shaqeyn

Sii 5 ilaa 10 daqiiqo, tus sawirada kala duwan oo weydii ka qaybgalayaasha sababta, sida ay qabaan, looga codsaday inay ka shaqeeyaan ereyadan gaarka ah?
Sharax in ogeysiinta, la-tashiga, awood-siinta, ka-qaybgalinta iyo la-shaqeynta bulshooyiinka uu saameeyey barakaca ay yihiin dariiqooyinka ugu waaweyn ee lagu hubinayo ka-qayb-galkooda qorshaynta, hirgelinta iyo kormeerka qorshaha ku saleysan Aagga/deegaanka. Inta lagu guda jiro kulankan, waxaan isku dayi doonaa oo aan raadin doonnaa habab aan ku ogeysiino/wargalinno,kula tashano, awood ku siino, uga qeybgelino lana shaqeyno bulshooyinka uu saameeyey barakaca si aan u horumarino qorshe ku saleysan aag/deegan oo ka tarjumaya baahidooda, nuglaantooda, awoodooda iyo walaacooda.

Kulankan wuxuu u qaybsan yahay afar qaybood:

1. **Isla-Xisaabtanka ay Dadka Waxyeeladu saameysay ku sameeyaan ururada hawlwadeenada (AAP) iyo qorshaynta ku saleysan bulshada, maxay yihiin??** This is an introductory section aiming at explaining what we mean by Accountability to Affected Population (AAP) and community-based approach as these approaches will guide the whole area-based planning process. This entails strengthening the capacities of both the DAC to take part to it and the local and national authorities to lead, coordinate and support this participatory process.
2. Tani waa qayb hordhac ah oo ujeedkeedu yahay sharaxaadda waxa aan uga jeedno La-xisaabtanka Dadka waxyeeladu saameysay (AAP) iyo habka ku saleysan bulshada maadaama hababkan ay hagi doonaan guud ahaan geedi socodka qorshaynta aagga/deegaanka oo dhan. Tani waxay ka kooban tahay xoojinta awoodaha bulshooyiinka uu saameyey barakaca labadaba inay ka qaybqaataan iyada iyo maamulada maxalliga ah iyo kuwa qaranku inay hoggaamiyaan, isku duwaan oo ay taageeraan geeddi-socodka ka qaybqaadashada loo dhan yahay.
3. **Qorsheynta Waxqabadka Bulshada** Bogga ugu horreeyay ee qaybta wuxuu bulshada u soo bandhigayaa bushada inay tahay qalab wax ku ool ah oo lagu hubinayo ka-qaybgalka macnaha leh

ee bulshooyiinka uu saameeyey barakaca. Kadib, waxaan isweydiineynaa yaa kaqeyb qaadanaya Qorshaha Waxqabadka Bulshada si loo hubiyo ka-qeyb-gal loo dhan yahay iyo matalaad? Sideen ku hubin karnaa in kuwa la soocay ay ku jiraan? Yaa hogaaminaya oo isku duwayaa? Qaybtani waxay ku dhisan tahay tiro koobka xubnaha bulshada iyo kooxaha xubnaha bulshada ee dhisan iyo la-hawlgalayaasha ay khusayso ee ka qayb qaadan kara, hoggaamin kara, isku duwi kara oo taageeri kara geeddi-socodka qorshaynta bulshada ku saleysan marka loo eego waaqica dhabta ah eek a jira deegaanka lagu qabanayo tababarka. Waxay ku bilaabaneysaa fiidiyowga mashruuca Midnimo (https://www.youtube.com/watch?v=xajkcqqzurs) that you will decide to show or not based on your objectives, timing and target audience oo aad go'aansan doonto inaad tusis ama aadan tusin ayadoo lagu saleynayo ujeedooyinkaaga, waqtigaaga iyo dhageystayaasha bartilmaameedka kuu ah.

4. **Qorshaha Waxqabadka Bulshada: sidee loo sameeyaa? Hab Talaabo talaabo ah:** Fulinta geedi socodka qorsheynta bulshada ee uu ka dhasha qorshe isku dhafan oo ka tarjumaya baahiyaha ay muujiyeen bulshooyinka uu saameyey barakaca waa mid ka mid ah hababka ugu wanaagsan ee lagu hubiyo in codadka bulshada la maqlo lana tixgeliyo. Qaybtani waxay soo ku talinaysaa sameynta hab talaabo tallaabo ah oo ku saleysan hagidda Midnimo si loo fuliyo geeddi-socod loo dhan yahay laga soo bilaabo qorshaha horumarinta illaa hirgelinta iyo kormeerka. Waad qaybin kartaa waadna tixraaci kartaa qoraal-gacmeedka cinwaankiisu yahay "CBP step by step methodology" kaasoo ah sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan habka loo isticmaalay mashruuca Midnimo.
5. **Laga soo bilaabo Qorshaynta Waxqabadka Bulshada ilaa laga soo gaaro qorshaynta deegaanka:** dhafan oo ku saleysan aag/deegaan isku-dhafan laysugu dari karo ama loogu kabi karo qorshayaasha horumarinta deegaanka ee ay hoggaamineyso dowladda. Qoraal-gacmeedka cinwaankiisu yahay "Xigashada qorshaha Baydhabo" waa in la qaybiyo oo laga wada hadlo marka la soo bandhigayo bogga ugu dambeeyay.

Wakhtiga

Kulankaan waxaa loo qorsheeyay inuu socdo labo saacadood hadaad dooratid dhamaan bogagga (qaarkood waa ikhtiyaari oo waxaa lagu calaamadeeyay sida sanduuqa warqadaha bogagga) iyo dhammaan howlaha la soo jeediyay:

- Qiyaastii 15 daqiiqo oo ah bilow-galaha (yaasha).
- Qiyaastii 10 daqiiqo qaybta hore ee AAAP iyo habka ku saleysan bulshada
- Qiyaastii 50 daqiiqo qaybta labaad oo ay ku jiraan tirokoobka ka-qaybgalayaasha qorshe hawleedka bulsho iyo muuqaalka fiidiyowga.

- Qiyaastii 20 daqiiqo qeybta saddexaad ee habka qorshe hawleedka bulsho.
- Qiyaastii 20 daqiiqo qaybta ugu dambeysa "laga bilaabo qorshe hawleedka bulsho ilaa laga gaaro qorshaynta maxalliga ah" oo ay ku jiraan daraasadda kiisaska iyo hawsha 2aad ee loo dhan yahay.

Hawlaha

I. Ayaa ku jira Qorshe Hawleedka Bulsho?

Hawsha 1aad: Tiro koobka ka qaybgalayaasha qorshe hawleedka bulsho.

Hawl kooxeed yoolkeedu yahay liis garaynta qorshe hawleedka bulsho ee waaqica ka jira deegaanka tababarka ka dhacayo.
U qoondee koox kasta qayb ka mid ah ururada hawlwadneeda (iyadoo kuxiran hadba waaqica ka jira deegaanka) kana codso inay taxaan 5 ilaa 7 hab-dhismeedyo jira (koox bulsho, urur, hay'ad) oo ay tahay inay kaqaybqaataan Qorshe Hawleedka Bulsho ee kusalaysan deegaanka. Ogsoonow in tirada guud ee kaqeybgalayaashu aysan ka badnaan 30.
Waa kuwan shuruudaha ugu muhiimsan ee hagi doona xulashada: Waxaad ku qori kartaa warqad la roga ee tababarka (Flip chart).

- Matalaad loo dhan yahay
- Caannimada
- U dhawaanshaha bulshada ay matalaan
- Jinsiga iyo isu dheelitirka da'da
- Awooda suuragalka ah ee inay ka qayb qaadan karaan geedi socod qorsheyn horumarineed oo fudud

Liisku waa inuu hubiyaa in dadka laga reebay, kuwa nugul iyo kuwa "aan muuqan" ay metelaad yeeshaan!
Haddii aanu jirin hab-dhismeed bulsho ama urur jira oo buuxinaya shuruuddahan, weydii ka-qaybgalayaasha inay ka fekeraan siyaabo loogu daro kaqeybgalayaasha ku haboon qorshe hawleedka bulsho.
Waa kuwan tusaalayaal qaybaha bulshada ee metelaad yeelanayo (waxaad u isticmaali kartaa waraaqaha midabada leh si aad u soo bandhigto wakhtiga is-xog wareysiga):

- Barakacayaasha
- Qaxootiga dalka dib ugu soo laabtay
- Qaxooti
- Bulshada martida loo yahay
- Beelaha la hayb sooco
- Dadka naafada ah
- Dadka ku nool aag gaar ah oo ku yaal deegaan xaddidan: degsiimooyiinka aan rasmiga ahayn, dadka halista ugu jira in laga raro deegaankooda, iwm.
- NGO-yada maxaliga ah iyo ururada bulshada rayidka ah
- Ururada iskaashatada
- Maamulada deegaanka maxaliga ah

IV. Laga soo bilaawo qorshe hawleed bulsho ilaa qorsheynta deegaanka maxaliga ah

Hawsha 2aad (ikhtiyaari). Fursadaha qorshe hawleedyada Bulsho. Soo bandhig hawshan kaliya haddii ay ku habboon tahay waaqica dhabta ah ee ka jira deegaanka.
Kulanka loo dhan yahay: Uruuri Xog tirojoob oo ku saabsan horumarinta deegaanka maxaliga ah iyo ajendhooyinka qorsheynta waaxyaha iyo fursadaha qorshe hawleedyada bulsho ama dhowr qorshe hawleedyo bulsho si loogu xidho habsami u socodka qorshaynta deegaanka maxaliga ah.
Tilaabada ugu horeesa:

- Ma jiraan horumarin maxalli ah iyo geedi-socod qorshaynta waaxyaha iyo ajenda ku saabsan aagga loo adeegsan doono ABA? Kumaa hogaaminaya oo isku duwaya intaa?
- Ma jiraan geedi socodyo qorshe hawleed bulsho oo kale oo ama qorshe hawleedyo bulsho oo horey loo soo saaray / la hirgaliyay?

Tilaabada labaad:

- Maxay noqon laheyd fursadaha lagu xira qorshe hawleedka bulsho ee xalalka ku saleysan aaga/deegaanka iyo horumarka deegaanka ama geedi socodka qorshaynta waaxyaha ama in la xoojiyo qorshe hawleedkan bulsho iyo kuwa kale ee suuragalka ah si ay u noqdaan qorshe deegaan oo isku dhafan?
- Qorshe hawleedkan bulsho miyaa lagu dari doonaa kuwa kale?
- Maxay yihiin barnaamijyada jira ee ku xirnaan kara qorshaha midaysan? ururada hawlwadeenada macquulka ah oo ku lug yeelan kara qorshaha noocan ah?

Diyaarinta

- Kala hadal qabanqaabiyeyaasha iyo la-hawlgalayaashaada bogga (qaarkood waa ikhtiyaari oo waxaa lagu calaamadeeyay sida ku qoran qoraalada bogagga) iyo hawlaha aad u malaynayso inay ku habboon yihiin in lagu qabto waaqica dhabta ah ee deegaanka tababarka ka dhacayo
- Waad u diyaarin kartaa hawsha 1aad waraaqaha la rogo ee tababraka loo isticmaalo (flip chart papers) kahor kulanka.
- Daabac qoraalka gacmeedka cinwaankiisu yahay "habka CBPda ee talaabo talaabo ah".
- Daabac qoraal gacmeedka cinwaankiisu yahay "Xigashada qorshaha Baydhabo". Mid qaybgale kasta

Xog faaido leh

- Horumarinta kaqeybgalinta daneeyayaasha badan si loo joogteeyo xalalka, warqada kooban ee ReDSS, Dec. 2019, oo laga heli karo halkan: https://regionaldss.org/index.php/research-and-knowledge-management/redss-publications/

- Casharrada laga bartay seddexda dalada EU RE-INTEG (EIDACS, JSC, SDSC), ReDSS, Oct 2019
- Hanaanka daneeyayaasha badan ee wax looga qabanayo barakaca magaalooyinka Soomaaliya, Mohamed Taruri, Laura Bennison, Shezane Kirubi and Aude Galli, FMR 63, Cities and Towns, Feb. 2020.
- Buugga Hagaha Fududeynta Hanaanka ku salaysan Qorshaynta Bulshada ee IOM